

## Fasaxyada soo socda ee dugsiyada xannaanada caruurta

Wakhti xaadirkan caruur badan ayaa la diiwaan geliyey in ay dhigan doonaan dugsiyada xannaanada caruurta xiliga fasaxyada. Iyadoo la eegayo xaalada aynu ku suganahay waxaanu idinka codsanaynaa waalidiin ahaan in aynu iskaashano, si ay caruurta iyo shaqaaluhuba u helaan fasax fiican oo nasasho ah.

Waxaanu rabnaa in aan idin xasuusino nidaamka nooga yaalaa markii waalidku/masuulka ilmuhu fasax yahay :

- Caruurta waa fasax marka waalidkood fasax yahay (fasax ay qaateen ama fasax jadwalka ugu qoran).
- Hadii labada waalid midkood aanu shaqayn, ama tusaale ahaan waalidnimo fasax ku yahay, isla markaasna waalidkii kale fasax ku jiro markaas oo kale ilmuhuna waa in uu fasax ahaadaa.
- Wa muhiim in aad soo ogeysiiso dugsiyada xannaanada caruurta wakhtiyada iyo maalmaha uu ilmahaagu dhigan doono xannaanada wakhtiyada fasaxyada lagu jiro.
- Ha ogeysiin soo xaadirista dugsiyada xannaanada '' (si loo habsado)''. Waxaa qorshahayaga u sal ah sida loo shaqaynayo hadba intii caruur lasoo sheegay in ay xannaanada imanayaan.
- Hadii uu qofkii waalidka ahaa ku khasbanaado in uu fasaxiisa joojiyo oo shaqadii dib ugu laabto markaas wuxuu xaq u leeyahay in caruurta loo hayo. Wixii isbedel ah sida ugu dhakhsiyaha badan ulasoo socod siiya dugsiyada xannaanada caruurta.
- Markasta cusboonaysii jadwalka saacadaha ilmuhu xannaanada joogayo adigoo adeegsanaya barta lagu wada xidhiidho ee VKlass wixii isbedel ahna sida ugu dhakhsa badan noola soo socodsii. Waa lagama maarmaan taasi hada si aan shaqaale ku filan u hawl gelino xannaanada, taas oo weliba muhiimad gaar ah leh wakhti xaadirkan.